Xafiiska Adeegyada Degdega ah ee Demada San Diego

# Tusmada Qorshaha Masiibada Qoyska iyo Badbaadada Qofka



# Tusmada Qorshaha Masiibada Qoyska iyo Badbaadada Qofka

## I. DIYAAR GAROOWGA

### Kulanada Qoyska

Ugu yaraan hal mar sanadkiiba, kulan laqaado qoyskaaga si aad uga doodaan qorshaha masiibada aadna isbadalo ugu samaysaan. Go'aan kagaara noocyada tababarka, qalabka, iyo adeegyada dheeriga ah ee loobaahanyahay si aad ubuuxisaan baahiyaha qoyska. Ha ilaawina inaad kutababarataan qorshaha! Mashiinada wax qoda ood kutababarato ayaa kor uqaadi kara waqtiga falcelinta kaana caawinaaya inaadan cabis awgeed iskudhex yaacin marka xaalad degdeg ah ay si dhab ah udhacdo.

**A.** Baro sida iyo meesha lada damiyo alaabaha.

Goobta Ugu Wayn ee Biyuhu Kasoo baxaan: ______________________________

Meesha Gaasku Kasoo baxo*: ______________________________

Goobta Baanadaha: ______________________________

Meesha Sida Cadiga ah loga Furo Albaabka Geerashka: ______________________________

Goobta Alaabaha Kale: ______________________________

* Hadamin gaaska ilaa inaad kashakido in dilaac kujiro maahee.

**B.** Waraaq gaar ah, kuqor qorshe laxariira sagxada gurigaaga adoo muujinaaya meesha ay kuyaalaan albaabada laga baxo iyo daaqadaha, meelaha laga damiyo qalabka, boorsada kurmadka degdega ah, iyo alaabaha xaalada degdega ah. Xaqiiji in QOFKASTA oo gurigaaga kudhaqan uu yaqaano. Tus qariirada dadka ilmaha haynaaya iyo martida guriga timaada markaad baxayso.

**C.** Meelaha qoysku dib ugu midoobaayo: Samayso laba meel oo adiga iyo qoyskaagu aad kukulmi kartaan kadib marka xaalad degdeg ah dhacdo. Mid kuyaala meel udhaw oo banaanka ka ah gurigaaga, tusaale, sanduuqa boostada dariska, jardiinada bulshada **IYO** goob kale oo kutaala banaanka aagaaga si aad ugu kulantaan markiinaan guriga kulaaban karin.

Goobta guriga: ______________________________

Meesha Guriga Kabaxsan: ______________________________

**D.** Xariirka Banaanka Gobalka: Magaca iyo nambarka taleefanka ee qofka kabaxsan gobalka si xubnaha qoysku uwacaan ayna usheegayaan meesha ay joogaan iyo xaaladooda. Qofkasta waa iuu xifdiyaa nambarkaan!

Magaca: ______________________________

Goobta: ____________________ Telefoon: (____) ____________________

**E.** Waa maxay xeerka masiibada ee dugsiga caruurtaada?

______________________________

______________________________

______________________________

Foomamka ogolaanshaha caafimaad ee caruurtaadu ma dhamaystiran yihiin mase yihiin kuwo markaas kuhaboon? ______________

Xagee ayay kuyaalaan? ______________________________

**F.** Isku aruuri Boorsada Qalabka Xaalada Degdeg ah ee Guriga. Gali meel aad kuqanacsan tahay oo aad kaso qaadan karto. Kafiiri qaybta VII wixii faahfaahin ah oo kusaabsan waxa ay tahay inaad galiso Boorsada Qalabka Xaalada Degdeg ah ee Guriga.

Meesha ay taalo Boorsada Qalabka Xaalada Degdeg ah ee Guriga: ______________________________

## II. TABABARKA

**A.** Baro sida naftaada looga difaaco waxyabaha soodhacaaya, qiiqa, dabka, qiiqa sunta ah, iwm.

**B.** Baro Guradka Degdega ah/CPR

Shaqsiyaadka Latababaray:

Magaca:________________________________________________Taariikhda Tababarku Dhacaayo: ________________________

Magaca:________________________________________________Taariikhda Tababarku Dhacaayo: ________________________

## III. KAHOR INTAAN MASIIBO DHICIN

Waxaan jiro noocyo badan oo masiibooyin kaladuwan ah, sida dhul gariirka, dabka, daadadka, diyaaraha burbura, dilaaca dhuumaha sunta kiimikada, qaraxyada, kuwaasoo aan inta badan digniin lahayn niyad jab intaas le'egna ku abuuri kara dadka kuwaxyeelooba. Inkastoo tusmadaani ay inta badan kahadlayso udiyaar garoowga dhul gariirka, talaabooyinka aad qaado waxay kacaawinayaan qoyskaaga inay udiyaar garoobaan nooc kasta oo masiibo ah kuwaasoo kuhabsan kara deegaankaaga. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan udiyaar garoowga masiibooyinka deegaanka kadhaca ee gurigaaga, dugsiga, iyo ganacsiga booqo **www.ReadySanDiego.org**.

**A.** Kadiiwaangali taleefankaaga gacanta, Taleefanka Hanaanka Cod saarka ee Interneetka (VoIP), ciwaanka iimeelkana kadiiwaangali AlertSanDiego*. **Laymanka taleefanada qoran iyo kuwa aan qornaynba horay ayaa loo diiwanagashay. Diiwaangalintu waxay inta badan xaqiijinaysaa inaad heli doonto ogaysiisyada xaaladaha degdega ah. Diiwaangalintu waa id degdeg ah oo fudud.**
**Waxaad sidoo kale heli kartaa macluumaadka oo kuqoran qaabab fudud sida Luuqada Dhagoolka ee Maraykanka.*

**B.** Soo dagso **SD Emergency App** ood kushuban karto aaladaha Android iyo iOS.

**C.** Kormeer kusamee gurigaaga. Raadi waxyaabaha halista eeni kara qiimayna kusamee marinada.

**D.** Sug amaanka qalabka biyaha kululeeya iyo qalabka guriga ee dhaadheer ama culus adoo kudhajinaaya darbiga.

**E.** Dhig waxyaabaha culus armaajooyinka hoose ee qaadanaha.

**F.** Rakib ilaaqaha, bareeska korontada iyo aaladaha wax lagu xiro ee albaabada armaajooyinka.

**G.** Taageero xoogan iyo iskuxir labadali karo usamee qalabka gaaska kushaqeeya.

**H.** Kasaar guriga ama meel amaan ah dhig waxyaabaha guban og.

**I.** Dulmar kusamee oo kutababaro qorshahaan.




## IV. MARKA UU DHACO DHULGARIIR

**A.** Hadaad gudaha guriga kujirto MEESHAADAAS KUJIR. Kafogoow daaqadaha, qaanadaha, iyo armaamooyinka sare/kor utaagan. Hoos gar miis ama marfash adag kadibna kudhag. Kudiyaar garoow inaad miiska raacdo kuna DHAGANOOW meeshaas ilaa gariirku joogsado ayna amaan tahay inaad miiska meeshiisii kuceliso. Haduusan jirin miis ama marfash aad hoos gasho, gal meel koonar ah. Iskafiiri alaabta soodhacaaya, uwa bidaaya iyo soo dilin diloonaaya, si gaar ahna iskaga ilaali aaga udhaw daaqadaha, maadaama ay soo go'i karaan marka dhulgariir dhaco.

> **FIIRO GAAR AH:** *Hadaad dagan tahay guri gaari ah kaasoo kufariista kaabayaasha Naqshada A, Fuul dusha sare ee sariirta ama miilka fadhiga kadibna dabool madaxaaga iyo wajigaaga. Hadii gurugaaga gaariga ah uu kaabayaasha jabsado waxaa suuragal ah inay lugu soo gudbaan gudaha guriga kadibna dhaawacyo kuugaystaan.*

**B.** Hadaad joogto banaanka, aad meel banaan oo kafog dhismayaasha, geedaha, marwaxadaha korontada dhaliya, darbiga ama dhagaxaanta jidadka lagu gooyo iyo waxyaabaha ee soo dhici kara.

**C.** Hadaad gaari wado, gaariga jooji oo gudihiisa kusgnoow ilaa inta gariirku joogsanaayo. Iskajir inaad istaagto meelaha udhaw geedaha iyo baalyaasha dabka ama dusha ama hoosta buundooyinka ama briijyada.

**D.** Hadaad kujirto dhismo dabaqyo badan kakooban, hoos gal miis kadibna kudhag, ama kudhuumo koonarka darbiga guriga ilaa gariirku joogsado. **HARAACIN WIISHKA GURIGA SI AAD GURIGA UGA BAXDO.** Raac jaranjarada.

**E.** Hadaad joogto dukaan, hoos gal miis ama shay kasta oo adag. Kadheeroow inaad hoos istaagto wax soo dhici kara. **HAKU ORDIN MESHA LAGA BAXO.** Marka gariirku joogsado, dooro meeshaad kabixi lahayd si taxadar leh.

## V. HADAAD DHISMAHA KABAXDO

**A.** Sii qaado:

- Boorsada daawada iyo gurmadka degdega ah
- Toosh, raadiyaha iyo batariyada
- Dukumiintiyada muhiimka ah iyo lacagta kaashka ah
- Bustayaal iyo dhar dheeraad ah
- Alaabaha nadaafada shaqsiga ah
- Iyo waxyaabo dheeri ah ood u aragto muhiim (tusaale, sawiro, waxyaabaha xasuusta kuuleh, dahabka, iwm.)

**B.** Nidaam usamee xayawaanka rabaayada ah. Ha ilaawin cuntada, daawooyinka, diiwaanada talaalka, iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah.

## VI. KADIB MARKA MASIIBO DHACDO

**A.** Kabo culus markiiba gasho si aad uga fogaato dhaawac kaasoo gaara ku istaagida dhalooyinka.

**B.** Raadso iftiin, sida tooshka, hadii loo baahdo.

**C.** Iskfiiri inaad dhaawac tahay oo gurmad degdeg ah isa sii.

**D.** Hubi inay jiraan dab ama halisaha dabka keena.

- Uri dilacyada gaaska, adoo kabilaabaaya mashiinta biyaha kululaysa. Haduu gaas kuusoo uro, ama aad maqasho cod wasiix ah ama aad kashakido in gaasku dilaacay, dai marinka ugu wayn ee gaaska, fur daaqada si taxadar lehna uga bax guriga. **HADAARIN HANA DAMIN LAYRARKA. HADAARIN TARAQYADA.**

  **FIIRO GAAR AH:** *Hadamin gaaska ilaa inaad kashakido in dilaac kujiro maahee. Kaliya shirkada gaaska ayaa adeegga dib uga shaqaysiin karta.*

- Haday muhiim noqoto, dami systemka korontada adookadaminaaya batoonka wayn ama bokiska qarxiyaha.

**E.** Fiiri xaalada dariskaaga.

**F.** Booqo www.SDCountyEmergency.com ama **SD Emergency App** si aad uhesho macluumaadkii ugu danbeeyay, meelaha dadka ladajinaayo, macluumaadka qariirada ee isdhexgalka (tusaale, aaga qiimaynta iyo meelaha halista xakameeya), taxanayaasha rasmiga ah ee baraha bulshada, iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah.

**G.** Dhagayso talooyinka la bixinaayo adoo adeegsanaaya raadiyaha batariga kushaqeeya. Xarunta Systemka Rasmiga ah ee Digniinta Xaaladaha Degdega ah ee Degmada San Diego waa KOGO AM 600. Xarunta labaad ayaa ah KLSD AM 1360.

**H.** Ha adeegsan taleefanka ilaa in xaalad degdeg ah kugasho maahee. Kaliya wac 9-1-1 wixii laxariira xaaladaha degdega ah ee nolosha halista ku ah. Hayso talefanka wax laga jaadgaraysto oo dhafoor moordi ah si aad u adeegsato hadii dabku kaadhaco, laakiin laymanka taleefanku ay wali shaqaynayaan.

**I.** Si aad uhesho macluumaadka guud oo faahfaahsan ee masiibada ama fursadaha tabarucaada, wac 2-1-1.

**J.** Hataaban laymanka dabka ee soo dhacay ama waxyaabaha taabnaaya fiilada korontada. Ha istaagin dhexda biyaha udhaw fiilooyinka dhulka kusoo dhacay.

**K.** Kqaad dhulka waxyaabaha wasaqda ah ee keeni kara inay dadka dhaawacaan.

**L.** Kbaar guriga, saqafka kore, iyo tuubada uumiga si aad ufiiriso dhibaato gaartay.

**M.** Udiyaar garoow dhul gariirada kan wayn kadanbeeya.

**N.** Fur meelaha xiran iyo armaajooyinka si taxadar leh waayo waxaa laga jaabaa in alaab so dhacday ama iskudhex daadatay.

**O.** Lashaqee saraakiisha badqabka bulshada.

**P.** Udiyaar garoow inaad dhimaha kabaxdo marka/hadii ay muhiim tahay.

**Q.** HA UBIXIN INAAD BANEENKA SOO WAREEGTO!

## VII. ALAABAHA XAALADA DEGDEGA AH EE GURIGA

Liiskaan waxaa kujira waxyaabaha inta badan yaala gurigaaga. Waxaa lagu talinayaa in loo nidaamsho loona meeleeyo si wada jira si loo helo marka xaalad degdega ah dhacdo. Cuntooyinka xaalada degdea ah waa inay kufilnaadaan inay kuhayaan adiga, qoyskaaga iyo xayawaankaaga rabaayada ah ***ugu yaraan 72 saacadood.*** Il kugu filan labo (2) asbuuc oo daawooyinka laguu qoray ah iyo xanuun baabi'iyaasha muhiimka ah ayaa lagu talinayaa inaad qaadato.

### Alaabaha Aasaasiga ah

- ❒ Biyaha* – ugu yaraan 1 dheemish qofkiiba
- ❒ Haqaadanina cuntooyinka qurmaaya*
- ❒ Boorsada Gurmadka Degdega ah iyo Buugeeda
- ❒ Qalabka qasaca fura – mid aan koronto kushaqayn
- ❒ Saacad – mid aan koronto kushaqayn
- ❒ Taleefanka dhafoor moordiga wax lagu jaad garaysto
- ❒ Lacagta cadaanka ah
- ❒ Dukumiintiyada muhiimka ah
- ❒ Bustayaasha ama boorsooyinka lagu seexdo oo uu qofkasta oo qoyska kamid ah midkiisa wato
- ❒ Raadiyaha – mid laqaadi karo, oo wato batariyaal isbeer ah
- ❒ Daawooyinka laguu qoro iyo kuwa qandho jabinta*
- ❒ Qalab dheeri ah – ookiyaalayaasha, waxyaabaha lagu cadaydo, kaalmaatiga maqalka
- ❒ Toosh – oo leh batari isbeer ah iyo guluubka iftiinka
- ❒ Dab damiska – ujeedooyinka badan lo adeegsado oo ay kuqoran tahay “ABC”
- ❒ Firinbiga
- ❒ Maaskaraatiga boorka
- ❒ Alaabaha kuciyaaraan dadka waawayn (tusaale, shaxda gaarka) iyo caruurta (tusaale buugaagta midabka ee wata qalimaanta midabka)

*Ubadbadal cuntada, biyaha, iyo daawooyinka hadba sidii muhiim noqota. Xasuusnoow inaad kafakarto dadka guriga kugula nool ee baahiyaha gaarka ah qaba: ilmaha sabiga ah, dadka duqoowda ah, kuwa naafada ah, dadka xasaasiyada qaba. Kafogoow cuntooyinka cusbadan badan, maadaama ay oon kugu ridayaan.

### Tilmaamaha Biyaha

Qaabka ugu fiican ayaa ah inaad biyaha lacabo sii kaydsato kahor intaan masiibo dhicin, aadna kushubto tanagyada kuhaboon. Hadaadan haysan biyaha lasifeeyay, Biyaha waa in lakariyaa muddo 1 daqiiqo oo dhamaystiran, adoo niyada kuhaynaaya in biyaha qaarkood ay dabaysha raacayaan. Daa biyuhu haqaboobeene si buuxda kahor intaadan isticmaalin.

### Alaabaha Nadaafada

- ❒ Bacaha wasaqda ah ee waawayn oo wasaqda lagu shubo, wax lagu nadiifiyo, iyo difaaca
- ❒ Suuf aad horay usii qoysay
- ❒ Saabuunta gacmaha iyo dareerayaasha wax lagu dhaqo
- ❒ Shaambada
- ❒ Daawada ilkaha iyo cadayga
- ❒ Alaabaha haweenka
- ❒ Alaabaha ilmaha sabiga ah
- ❒ Suufka musqusha iyo shukumaanada
- ❒ Waxyaabaha la isku carfiyo

### Alaabaha Cunto karinta

- ❒ Bacaha caaga ah – oo xajmiyo kaladuwan leh, lana xiri karo
- ❒ Balayrada xaashida ah, maacuunta caaga ah, shukumaanada xaashida ah
- ❒ Digsiyada (wax lagu kariyo) – ugu yaraan labo
- ❒ Burjiko ama haanta gaaska; dhuxul iyo qarxisadaha wax lagu daaro ama propane (**kaliya waxaa lagu adeegsan karaa banaanka guriga**); Shoolada Sterno®

## VII. ALAABAHA XAALADA DEGDEGA AH EE GURIGA (WAY SOCOTAA)

### Alaabaha badqabka

- ❒ Mindi, sakiin, iyo qalab waxyaabo badan loo adeegsado
- ❒ Dharka – Dhar uu si buuxda iskaga badali karo qof kasta oo qoyska kamid ah

  (Waxaa fiican surwaalada dhaadheer iyo shaarar gacmo dheeraha ah si ay difaac unoqdaan)
- ❒ Galoofyo waawayn oo qofkasta oo wayn uu xidho
- ❒ Kabo culus oo qofkasta oo qoyska kamid ah wato

### Alaabaha Xayawaanka Rabaayada ah

- ❒ Qalabka lagu qaadaayo
- ❒ Cunto
- ❒ Daawo
- ❒ Dukumiintiyada muhiimka ah sida diiwaanada talaalka iyo macluuaadka shatiga
- ❒ Suunka qoorta loo gasho oo wata ID iyo qool ama xarig lagu xidho
- ❒ Biyaha
- ❒ Alaabaha nadiifinta – Xamalka iyo jaqafka wasaqda lagu qaado

### Boorsada Qalabka Badbaadada Gaariga

- ❒ Cunto aan qurmayn
- ❒ Qoryaha iftiimaaya
- ❒ Biyaha dhalada kujira
- ❒ Boorsada Gurmadka Degdega ah iyo Buugeeda
- ❒ Dab damiska
- ❒ Buste
- ❒ Boorsooyinka caaga ah oo laxriri karo
- ❒ Toosh leh batariyaal dheeri ah
- ❒ Qalabka iyo tuubada cinjirka ah
- ❒ Daawada muhiimka ah
- ❒ Suuf aad horay usii qoysay iyo xaashiyada
- ❒ Dhar dheeri ah

## VIII. NAMBARADA TALEEFANKA MUHIMKA AH

**WAC "9-1-1" SI AAD UDALBATO GURMAD LAGAA SIIYO XAALADAHA DEGDEGA AH EE NAFTAADA HALISTA KU AH KALIYA**

**WAAXDA DAB DAMISKA AAN XAALADA DEGDEGA AHAYN:** ____________________

**WAKAALADA LAANTA SHARCI FUINTA XAALADAHA AAN DEGDEGA AHAYN:** ____________________

**DHAKHTARKA RASMIGA AH:** ____________________

**SHIRKADA GAASKA:** ____________________

**SHIRKADA KORONTADA:** ____________________

**SHIRKADA BIYAHA:** ____________________

**XARIIRKA BANAANKA GOBALKA:** ____________________

**XAKAMAYNTA SUNTA:** 1-800-222-1222

**MID KALE:** ____________________

# Tusmada Qorshaha Masiibada Qoyska iyo Badbaadada Qofka

## IX. KUTABABARTA QORSHIHIINA KAQOYS AHAAN

**A.** Tababarashadu waxay kacaawisaa dadka inaysan wax kuwareerin ayna sifiican ugu diyaar garoobaan hadii masiibo timaado – xataa saqda dhexe habaynkii.

**B.** Xaqiiji in qoyskaagu yaqaano meesha ay yaalaan qalabka dab damiska, meelaha laga damiyo gaaska iyo biyaha, iyo batoonka guud ee korontada.

**C.** Wax Kabadal Qorshaha Masiibada ee Qoyskaaga sanad kasta.

- Xaqiiji nambarada taleefanada iyo macluumaadka shaqsiga ah ee qofkasta oo kuqoran qorshaha.
- Daabaco koobiyada noocii ugu danbeeyay ah si aad usiiso dhamaan xubnaha qoyska.

**D.** Hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah, waa inaad taqaanaa qorshaha masiibada ee dugsiga.

- Go'aanso waxa loo baahan yahay si cunugaaga loogu ogolaado wakiiladaada hadaadan adigu imaan karin.
- Xaqiiji in dugsigu yaqaano macluumaadka hadda lagaalasoo xariiri karo iyo kuwa dadka fasaxa uhaysta inay cunugaaga soo wadaan.

**E.** Hubi waxyaabaha kujira boorsooyinkaaga gurmadka degdega ah.

- Badal batariyaasha tooskaaga iyo raadiyahaaga gacanta; kubadal batariyada dheeriga ah.
- Dib ucabee boorsooyinkaaga gurmadka degdega ah. Badal dhalada biyaha; xaqiiji in dhamaan cuntadu badqabto si loo cuno iyo inaan daawooyinku dhicin.

---

Xubin kasta oo katirsan qoyska waa inay qaadaa koobiga macluumaadkaan muhiimka ah:

**MACLUUMAADKA XARIIRKA MARKA MASIIBO TIMAADO**

Xariirka Banaanka Gobalka:

Magaca:_______________________________________

Taleefanka: ___________________________________

Goobta Kulanka Qoyska ee Xaafada:

______________________________________________

Goobta Kulanka ee Kabaxsan Xafada:

______________________________________________

Wac 2-1-1 si aad uhesho macluumaadka masiibada sida hooyga, wadooyinka laxiraayo, meelaha dhibaatadu saamaysay, iyo barnaamijyada gurmadka iyo baxnaaninta.

**MACLUUMAADKA XARIIRKA MARKA MASIIBO TIMAADO**

Xariirka Banaanka Gobalka:

Magaca:_______________________________________

Taleefanka:___________________________________

Goobta Kulanka Qoyska ee Xaafada:

______________________________________________

Goobta Kulanka ee Kabaxsan Xafada:

______________________________________________

Wac 2-1-1 si aad uhesho macluumaadka masiibada sida hooyga, wadooyinka laxiraayo, meelaha dhibaatadu saamaysay, iyo barnaamijyada gurmadka iyo baxnaaninta.

**MACLUUMAADKA XARIIRKA MARKA MASIIBO TIMAADO**

Xariirka Banaanka Gobalka:

Magaca:_______________________________________

Taleefanka: ___________________________________

Goobta Kulanka Qoyska ee Xaafada:

______________________________________________

Goobta Kulanka ee Kabaxsan Xafada:

______________________________________________

Wac 2-1-1 si aad uhesho macluumaadka masiibada sida hooyga, wadooyinka laxiraayo, meelaha dhibaatadu saamaysay, iyo barnaamijyada gurmadka iyo baxnaaninta.

**MACLUUMAADKA XARIIRKA MARKA MASIIBO TIMAADO**

Xariirka Banaanka Gobalka:

Magaca:_______________________________________

Taleefanka:___________________________________

Goobta Kulanka Qoyska ee Xaafada:

______________________________________________

Goobta Kulanka ee Kabaxsan Xafada:

______________________________________________

Wac 2-1-1 si aad uhesho macluumaadka masiibada sida hooyga, wadooyinka laxiraayo, meelaha dhibaatadu saamaysay, iyo barnaamijyada gurmadka iyo baxnaaninta.

# Tusmada Qorshaha Masiibada Qoyska iyo Badbaadada Qofka

**OGAYSIIS:**

Macluumaadka kujira waraaqdaan macluumaadka waxa la aaminsan yahay inuu yahay mid saxan oo farsamo ahaan muhiim u ah udiyaar garoowga masiibada, hase yeeshee, majirto wax damaanad ah oo laga bixin karo in tilmaamaha kuqoran ay difaac kusiinayaan.

Degmada San Diego, Xafiiska Degmada San Diego ee Adeegyada Degdega ah, Ururka Midaysan ee Adeegyada Degdega ah ee Demada San Diego, Golaha Midawga Masiibooyinka ee saraakiisha urur kasta, shaqaalaha, iyo wakiilada, maqaadayaan wax masuuliyad sharci ah oo laxariirta saxnaanta, hufnaanta, ama muhiimada macluumaad kasta, alaab, ama hanaan halkaan lagu sharxay, ama wax dhaawacyo aa dhibaatooyin ah oo kadhasha masiibo kasta ama shil kadhasha adeegsiga ama kudhaqanka macluumaadkaan, alaabaha ama hanaanka lagu qeexay ama lagu sharxay meeshaan.

**Taleefanka Xafiiska Adeegyada Degdega ah ee Demada San Diego:** (858) 565-3490
**Webseetka:** [www.ReadySanDiego.org](http://www.ReadySanDiego.org)

Gudiga Kormeerayaasha Demada San Diego

| Greg Cox | Dianne Jacob | Kristin Gaspar | Nathan Fletcher | Jim Desmond |
|---|---|---|---|---|
| Degmada 1 | Degmada 2 | Degmada 3 | Degmada 4 | Degmada 5 |

Sawirada Jaldiga oo uu Bixiyay Robert A. Eplett/Cal-EMA

Dukumiintigaan waxa alagu diyaarshay deeq ay bixiyeen Golaha Agaasimayaasha Barnaamijyada Deeqda ee FEMA, U.S. Department of Homeland Security (Waaxda Amaanka Gudaha ee Maraykanka). Fikradaha ama ra'yiyada lagu sheegay dukumiintigaan waa kuwa qoraaga macnahooduna maaha inay wakiil kayihiin mabda'da rasmiga ah ama xeerarka Golaha Agaasimayaasha Barnaamijyada Deeqda ee FEMA ama U.S. Department of Homeland Security.

**DIYAAR GAROOWGAAGU ADUU KAABILOOWDAA!**